

## Bridger SE Enrollment and Program Recommendation

4/28 Community Meeting <a href="#">Presentation</a>	
QUESTION	RESPONSE
Sidee shaqaalahu uu u saamayn karaa Isbadalku?	Hadii talo bixinta ay aqbasho Gudigu bisha May 24'keeda, koox ka kooban la-hawlgalayaasha shaqada iyo shaqaalaha dagmada ayaa isla markaa ka dib bilaabi doona si ay u go'aamiyaan habka loogu talagalay waxbarida iyo kalasocida xirfadlayaasha ee uu saamayn doono dayrta 2023.
Ogolaanshaha barnaamijka hal-koox kaliya ee Spanish DLI inuu sii ahaado Atkinson waa sinaan la'aan. Maxay tani u dhacaysaa?	SEGC waxay tixgalisay kala doorashooyin badan si loo abuuro barnaamijyada labada luuqadood ee DLI iyo Ingiriisiga ah oo balaadhan xoogna leh. Isku dhafka/Isku darka dhamaan barnaamijyada labada luuqadood ee K-5 DLI ee dhamaan goobaha dugsiga oo dhan waxay heshay taageero yar, taa waxa qayb ka ah sababtoo ah is badalada badan ee loo baahday in xuduudaha lagu sameeyo sii loo saxo cabirka dugsiyada ka dib marka barnaamijka la raro. Dayrtii hore Gudigu waxay xaqiijiyeen in barnaamijyada hal-koox ee Ingiriisiga-kaliya in la siiyo mudnaanta is badalka. Barnaamijka Ingiriisiga-kaliya ee Atkinson waxa uu leeyahay laba-kooxood heerkii fasalba, halka Bridger iyo Lent ay leeyihiin barnaamijyo hal-koox kaliya. Barnaamijka Atkinson DLI oo ah hal-koox kaliya maaha mid ku haboon waxaana loo tixgalin karaa isbadal in lagu sameeyo mustaqbalka.
Codsiga taageerada dheeraadka ah ee sanadka farqiga u dhexeeya ee barnaamijka xaafada: EAs, shaqaale bulsho oo wakhti buuxa ah, ½-wakhti ka qaybqaadashada tababaraha, u ogolow ardayda fasalada 5aad inay codsi u gudbiyaan Kellogg.	Codsiga waa la helay waana la tixgalin doonaa.
Miyey tahay ikhtiyaar CSS in loo badalo K-5? Ardayda Bridger waxay doonayaan in ay aadaan dugsi dhexe, dhismuhuna aad u buuxsami doonaa K-8 ahaan.	Dayrtii hore Gudigu waxay xaqiijiyeen taageerada ardayda CSS ee hadhay K-8 ahaan. Furitaanka Harrison Park MS wuxuu ogolyahay wadahalal joogto ah oo ku saabsan kala doorashooyinka loogu tala

	galay ardayda fasalada 6-8.
Sidee ayaa ardayda BIPOC udub dhexaad ugu ahaayeen soo jeedintan?	Yoolka ugu muhiimsan ee nidaamkan ayaa ah in la horumariyo helitaanka barnaamijyo xoogaan oo loogu tala galay ardayda BIPOC. <a href="#">Falanqayntan</a> ayaa sharaxaysa arrimaha iyo horumarinada muhiimka ah ee dugsiyada iyo barnaamijyada leh heerarka ugu sareeya ee ardayda Madaw iyo kuwa Dhaladka ah, oo ay ku jiraan barnaamijka Bridger ee Luuqada Ingiriisiga-kaliya.
Waa maxay faaidooyinka DLI ee dugsiya oo dhan?	Faaidooyinka DLI ee dugsiya oo dhan waxa ka mid ah iskaashiga horumarsan iyo fursadaha waxbarasho xirfadadeed, oo xooga lagu saarayo isku dhafka dhaqanka dugsiya iyo helitaanka agabka iyo fursado wanaagsan si loo taageero ardayda afka hooyo ku hadasha, oo ay ku jiraan kuwa yimaada xanaanada ka dib.
Imisa qoys oo DLI ah ayaa ka bixi doona oo waydiisanaya inay sii joogaan Bridger? Ka walaacsan in barnaamijka DLI aanu mid xoogan noqon doonin oo Bridger uu mar kale buux dhaafi doono.	Qoysaska ku jira DLI waxay codsan karaan ku noqosho dugsiyada xaafadahooda iyagoo u maraya codsiga adag. Qoysaska xaafada Bridger ayaa ka leh mudnaanta Bridger-Creative Science ardayda kale ee ku nool xaafadaha kale.
Hadii Bridger uu noqdo CSS, miyey macalimiinta Bridger Joogi doonaan? Miyey Maestra Kirey wali ka sii shaqayn doontaa dhismaha Bridger? Bridger waligii miyaa la xidhi doonaa?	Marka go'aanka la qaato, kooxaha la hawlgalayasha shaqada iyo shaqaaluhu waxay bilaabi doonaan inay qorsheeyaan habaynta shaqaalaha dhabta ah. Waxaanu u mahad naqaynaa taageerada macalimiinta Bridger. Bridger ma xidhna oo qayb ka ah habkan.
Waa maxay sababta Atkinson hal koox oo laba-luuqadlaha ah aan loogu rarayn Lent? Waa maxay sababta ay u saxan tahay halka koox oo heerka codsiga dadka ku hadla afka hooyo ma halkaas ma sareeyaa?	Ikhtiyaarka ah in Lent uu noqdo goob K-5 kaliya ah oo loogu tala galay SE Spanish Immersion SEGC may taaageerin. Barnaamijyada hal koox ee laba-luuqadlaha ah kuma haboon, laakiin barnaamijyada Ingiriisa ee hal koox ah ayaa aad u saameeya ardayda midabka leh taas ayaanu habkani mudnaan sare siinayaa. Atkinson waxa ay heshaa codsadayaal ku filan oo ku hadla luuqada isbaanishka dhaladka ah sanad walba si ay u buuxiyaan 50% kuraasta xanaanada.
Hadii DLI ay u guurto Lent macalimiintuna sidoo kale ma guuri doonaan?	Marka go'aanka la qaato, kooxaha la hawlgalayasha shaqada iyo shaqaaluhu

	waxay bilaabi doonaan inay qorsheeyaan habaynta shaqaalaha dhabta ah.
QoysaskaXaafada (S of Division), ee leh arday dhigata fasalada 6aad ee dayrta 2023, ma loo tixgalin doonaa inay sii joogaan CSS iyadoo loo tixgalinayo walaalaha yaryar ee doortay inay ku biiraan CSS sidoo kale?	Ardayda dhigata fasalka 5aad ee fasalka Ingiriisiga Bridger sanad dugsiyeedka 2022-23 ayaa si toos ah loogu diiwan galin doonaa 6aad Bridger/Sayniska Hal-abuurka 2023-24. Walaalaha yaryar waxay yeelan doonaan xuquuq in ay iska diiwan galiyaan ka yar waxay yeelan doonaan xuquuq in ay iska diiwaan galiyaan Bridger/Creative Science, ilaa inta walaalka ka weyn uu weli ku sii jiro dugsiga.
Miyaa dhamaan ardayda hada dhigata loo ogolaan doonaan inay badalaad qaataan?	Dhamaan ardayda hada dhigata barnaamijka Ingiriisiga waxay xaq u yeelaan doonaan inay sii joogaan Bridger ama ay badalaad u qaataan Clark ama Harrison Park. Dhamaan ardayda hada dhigata barnaamijka DLI waxay xaq u yeelaan doonaan inay u guuraan Lent, ama codsadaan badalaad ah inay dib ugu laabtaan dugsiga xaafadooda ama dugsi kale. Damaanad qaadka ku soo celinta xaafada ayaa waxay ahaan doontaa codsiyada la helo inta lagu guda jiro wareega badalaada.
Waa maxay quudiyaha dugsiga sare ee CSS oo leh badalaadaha cusub ee xuduuda.	Ardayda CSS waxay xaadiraan dugsiyada sare ee xaafadooda. Dugsiga sare ee xaafada Bridger wuxuu sii ahaan doonaa Franklin.
Waxa maxay ikhtiyaarada 2022 ee xaafada ee ka qalin jabinaysa fasalka 5aad inay aadaan MS halkii ay ka aadi lahaayeen K8?	Qoysaska jecel inay aadaan dugsi dhexe oo aan la qiimaynayn dhibcaha ardaygu haysto waa inay soo dhamaystiraan codsiga badalaada, adigoo halkan ka galay <a href="https://ppsnew.schoolmint.net">https://ppsnew.schoolmint.net</a> . Boosasku waa xadidan yihiin waxaana laga yaabaa in codsiyada la ogolaan waayo.
Haysashada SDLI ee Atkinson ma u siman yahay dadka ku hadla ee u dhashay luuqada Isbaanishka?	Barnaamijyada DLI kaliya ahi maaha kuwa ku haboon, laakiin barnaamijka Atkinson wuxuu raacayaa qaabka la doorbiday ee 2-da wado maadaama oo ay helaana codsadaayaal dhalad ah ee ku hadla luuqada Isbaanishka inay buuxiyaan 50% boosaska.
Sidee ayay u badalashada DLI ee Creative Science ay u caawisaa xaafada?	Ardayda xaafada waxay qayb ka noqon doonaan barnaamij wayn, oo leh fursada inaad arday kala duwan isku fasal noqotaan sanad walba, iyo macalimiin leh tababar u

	dhigma heerka fasalka.
Waa maxay sababta ay u liidato deeqda Title Funds ee loogu tala galay dugsiyada dakhligoodu liito? Maxaa lacagtaa iyada ah Loogu qoondayn waayey dugsigeena?	Title I funds ayaa la qoondeeyey iyadoo lagu saleeyay Habraacyada Federaalka iyo Gobolka. Deeqda lacagta ah waxa loo qoondeeyey dugsiga oo dhan, ee looma qoondayn qaybo dugsiga ka mida, iyadoo lagu saleeyay heerka dugsiga oo dhan ee ardayda u qalma cuntada lacag la'aanta ah. Ma jiraan arday ku filan oo ka diiwan gashan Bridger guud ahaan si ay u buuxiyaan heerka ugu hooseeya ee helitaanka deeqda Title I.
Hadii aanu ku noolnahay koonfurta Division, oo aanu hada dhigano DLI, ma yeelaan doonaa ikhtiyaarka ah in aanu xaadירו barnaamijka DLI Atkinson? Amaba kaliya barmaajiyda xaafada?	Qoysaska ardayda Bridger DLI ee ku nool aaga u dhexeeya Division iyo Woodward waxay ka codsan karaan badalaad Atkinson English ama DLI strands halkan <a href="https://ppsnew.schoolmint.net">https://ppsnew.schoolmint.net</a> . Natijada waxa lagu salayn doonaa sida loo helo meel banaan.
Waa maxay cabirka (sq ft) ee Bridger marka la barbar dhigo K-5 kale, iyo ama dugsiyadii hore ee K-8 ee dagmadu?	Ma hayno isbarbardhiga dugsi-ka-dugsi si fudud loo heli karo oo lagu saleeyay footage sq ft, laakiin <a href="#">warbixintan ka faa'iidaydigu</a> waxay muujinaysaa awoodda fasalka ee dhamaan dugsiyada degmada.
Ma jirtaa wado uun oo dhismaha lagu kordhin karo xajmiga square ft ka si loo fududeeyo tirada xad dhaafka ah?	Ma jiro qorshe taas lagu samaynayo wakhtigan. Kordhinta fasalka ama balaadhinta tashiilaadka la midka ahi waxay u badan tahay inay ku kacaan malaayiin doolar oo ogolaanshahooda iyo dhismahoodu uu qaato wakhti sanad ka badan.
Suurta gal ma tahay in ardayda xaafadeena loo ogolaado CSS Bridger?	Hadii ardaygaagu ka diiwan gashan yahay barnaamijka Ingiriiska Bridger sanadka soo socda waxa si toos loogu dari doona Bridger/Creative Science sanadaha soo socda. Hadii ardaygaagu xaadiro dugsi kale ama barnaamij kale waxaad u baahan doontaa inaad codsato in lagu badalo Bridger/Creative Science.
Suurta gal ma tahay in laga baxo Bridger oo anagu naf ahaantayada aanu doorano dugsiga kale (Atkinson, Harrison Park) ee uu canugayagu aado. Amaba miyaa lagu qasbi doonaa inay aadaan dugsi gaar ah?	Ardayda xaafada Bridger waxa loo damaanad qaadayaa u badalaada Clark K-5 ama Harrison Park MS. Codsiyada dugsiyada kale waa la ogolaan karaa ama la diidi karaa, iyadoo lagu salaynayo helitaanka boos banaan.
Qaabka gaadiidka ma loo heli doonaa si la	Jidka baska ayaa lagu dari doonaa laga

mid ah Richmond?	bilaabo xaafada Bridger ilaaa Lent ee Spanish DLI.
Dadka dhaladka ah ee ku hadla luuqada Isbaanishka miyaa la siin doonaa mudnaan ah codsiga Atkinson sababtoo ah masaafada ay u jirto Lent oo aad u fog?	Dadka Dhaladka ah ee ku hadla luuqada Isbaanisha ayaa guud ahaan leh mudnaanta u badalaada barnaamijyada DLI, laakiin ogolaanshaha waxa lagu salaynayaa helitaanka boos banaan.